**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

**REPUBLIC OF SOMALILAND**

**XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA**
**SOLICITOR GENERAL OFFICE**

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند



| Sannadkii 13aad | Cadad Gaar ah | Tariikhda Daabacada 23/11/2024 |
|---|---|---|



# XEERKA NIDAAMKA GARSOORKA CIIDAMADA QARANKA
# XEER LR.107/2024


**Email: garyaqaankaguud@gmail.com**
**Web.www.garyaqaankaguud.com**


*Sannadka 2024*

*Lama iibin karo*
*Not for sale*

# JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## Xafiiska Madaxweynaha

**Sum: JSL/XM/WM/222-1372/102024** **Taar: 27/10/2024**

# Wareegto Madaxweyne

**Dhaqan-galka Xeerka Nidaamka Garsoorka Ciidammada Qaranka JSL, Xeer Lr: 107/2024**

**Markaan Arkay:** Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markaan Arkay:** Qodobbada 75aad, 77aad iyo 78aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

**Markaan Arkay:** Qoraalka Golaha Wakiillada ee summaddiisu tahay GW/KF-9/26/2024, kuna taariikhaysan 09/10/2024, Ujeeddadiisuna tahay Soo-gudbinta Go'aanka Ansixinta Xeerka Nidaamka Garsoorka Ciidammada Qaranka JSL, Xeer Lr: 107/2024,

**Waxaan soo-saaray;**

**Wareegtadan oo lagu baahinayo Dhaqan-galka Xeerka Nidaamka Garsoorka Ciidammada Qaranka JSL, Xeer Lr: 107/2024.**

**Allaa Mahad Leh**

REPUBLIC OF SOMALILAND
President

**Muuse Biixi Cabdi**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**Ujeedo: Go'aanka Ansixinta Xeerka Nidaamka Garsoorka Ciidamada Qaranka**

**Xeer Lr. 107/2024**

**GOLAHA WAKIILADDU**

| | |
|---|---|
| Markii uu arkay: | Qodobka 104aad ee Dastuurka Somaliland oo si' cad u tilmaamaya in maxkamadaha ciidamada iyo xeer-ilaalintoodu ay yeelato xeer u gaar ah. |
| Markii uu arkay: | Qodobka 97aad ee Dastuurka oo dammaanad qaadaya madaxbannaanida garsoorka guud ahaan oo uu ku jiro garsoorka ciidamadu. |
| Isaga oo ogsoon: | In tan iyo markii aftida dadweynaha lagu ansixiyay Dastuurka in aan la'samayn xeer lagu maareeyo nidaamka garsoorka ciidamada oo lafdhabar u ah caddaaladda ciidanka iyo garqaadistiisii . |
| Markii uu xaqiiqsaday: | Baahida weyn ee loo qabo in la'helo xeerar ka farcama Dastuurka oo waafaqsan mabaadii'da iyo qiyamka ku astaysan Dastuurka. |
| Markii uu la'tashaday: | Dhammaan cidda ay khusayaso si'dhowna u dersay xaaladda iyo xeerarka khuseeya. |

RECEIVED BY PRESIDENCY: 09 OCT 2024 Reg No: 1223

| | |
|---|---|
| Markuu Tixgaliyay:- | Go'aanka Ansaxinta **Xeerka Nidaamka Garsoorka Ciidamada Qaranka JSL Xeer Lr. 107/2024** ee Golaha Wakiilladu u Gudbiyeen Madaxwaymaha JSL kuna taariikhsanayd 110/07/2024 Kal-fadhigii 7aad fadhigiisi 15aad. |
| Markuu U Codeeyey:- | In Madaxwayuhu wax-ka-bedel iyo kaabis ku samayey **Xeerka Nidaamka Garsoorka Ciidamada Qaranka JSL Xeer Lr.107/2024** |
| Markuu u codeeyay: | Soo jeedinta wax ka badelka iy kaabista **Xeerka Nidaamka Garsoorka Ciidamada Qaranka JSL Xeer Lr. 107/2024** Kal-fadhigii **19aad, fadhigii 9aad** kuna taariikhaysanayda **15 Sep 2024 oo ay fadhiyeen 55 Mudane.** |

## WUXUU

Cod aqlabiyada **ah (39 cod)** oo gacan taaf ah ku ansixiyay Xeerka Nimdaamka Garsoorka Ciidamada Qaranka JSL **Xeer Lr. 107/2024.**

| | |
|---|---|
| **Jamaal Jaamac Jiir** | **Md. Siciid Mire Faarax (Giire)** |
| Ku-xigeenka Xoghayaha Guud ahna ku-simaha Xoghayaha Guud ee G/Wakiillada JSL | Gudoomiye Ku-xigeenka 1aad ahna ahna ku-simaha Gudoomiyaha G/Wakiillada JSL |

GOLAHA WAKIILADA
JAMHUURIYADDA SOMALILAND

## GOLAHA WAKIILLADA JSL

**Markii uu arkay:** Qodobka 104aad ee Dastuurka Somaliland oo si' cad u tilmaamaya in maxkamadaha ciidamada iyo xeer-ilaalintoodu ay yeelato xeer u gaar ah.

**Markii uu arkay:** Qodobka 97aad ee Dastuurka oo dammaanad qaadaya madaxbannaanida garsoorka guud ahaan oo uu ku jiro garsoorka ciidamadu.

**Isaga oo ogsoon:** In tan iyo markii aftida dadweynaha lagu ansixiyay Dastuurka in aan la'samayn xeer lagu maareeyo nidaamka garsoorka ciidamada oo lafdhabar u ah caddaaladda ciidanka iyo garqaadistiisii.

**Markii uu xaqiiqsaday:** Baahida weyn ee loo qabo in la'helo xeerar ka farcama Dastuurka oo waafaqsan mabaadii'da iyo qiyamka ku astaysan Dastuurka.

**Markii uu la'tashaday:** Dhammaan cidda ay khusayaso si'dhowna u dersay xaaladda iyo xeerarka khuseeya.

**Wuxuu ansixiyay:**

## Xeerka Nidaamka Garsoorka Ciidamada Qaranka
## Xeer Lr. 107/2024

## QAYBTA KOOWAAD
## MABAADII'DA GUUD

### Qodobka 1aad
### Magaca xeerka

Xeerkan waxa loogu yeedhayaa Xeerka Nidaamka Garsoorka Ciidamada Qaranka, Xeer Lr.107/2024

### Qodobka 2aad
### Erey-bixin

Haddii aan nuxurku si'kale tilmaamin, ereydan waxa looga jeedaa:

| | |
|---|---|
| **Madaxweynaha:-** | Waxa loola jeedaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland. |
| **Wasiirka:-** | Waxa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga. |
| **Xubnaha Ciidamada Qaranka:-** | Waxa loola jeedaa xubnaha ciidamada Qaranka ka tirsan ee kala ah Milateriga, Asluubta, Booliska, Ilaalada Xeebaha, Laanta Socdaalka, Dab-demiska iyo ciidan kasta oo xeer dhaqan-gal ah ku aasaasan. |
| **Denbi-baadhe:-** | Waxa loola jeedaa sarkaal u xil-saaran baadhista denbiyada oo ka hawlgala Waaxda Baadhista Denbiyada iyo Xeer-ilaalinta Guud. |
| **Xeer-ilaaliyaha Guud:-** | Waxa loola jeedaa Xeer-ilaaliyaha Guud ee Maxkamadda Ciidamada. |
| **Kaaliye Maxkamadeed :-** | Waxa loola jeedaa kaaliye ka hawl-gala maxkamadaha ciidamada. |
| **Kaaliye Sare :-** | Waxa loola jeedaa kaaliyaha sare ee Maxkamadda Sare ee ciidamada. |
| **Maxkamadda Derajada Koowaad :-** | Waxa loola jeedaa maxkmadda derajada koowaad ee **aagga** ay awoodda u leedahay gar-maqalka dacwadda. |
| **Qaraar:-** | Waxa loola jeedaa qaraarrada ka soo baxa maxkamadaha ciidamada. |
| **Awoodda Gaarka ah ee Maxkamadda:** | Waxaa loola jeedaa awoodda gar-maqalka dacwadaha ee maxkamadaha ciidamada. |



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

| | |
|---|---|
| **Maxkamadaha Ciidamada Qaranka :-** | Waxa loola jeedaa maxkmadaha kala ah Maxkamadda Sare iyo maxkamadaha derajada koowaad. |
| **Hay'adaha Garsoorka Ciidamada:-** | Waxa loola jeedaa maxkamadaha iyo xeer-ilaalinta ciidamada. |
| **Guddida Hawlaha Maamulka Garsoorka Ciidamada :-** | Waxa loola jeeda guddida ku aasaasan Qodobada 23 iyo 24aad ee Xeerkan, isla markaana xilkeeda iyo waajibaadkeeda lagu jideeyay xeerkan. |
| **Miisaaniyad:-** | Waxa loola jeedaa miisaaniyadda hay'adaha garsoorka ciidamada. |
| **Xafiiska Denbi-baadhista:-** | Waxa loola jeedaa waaxda denbi-baadhista. |
| **Xilliga Nabadda:-** | Waxa loolaa jeedaa xilliga aanay jirin colaado. |
| **Xilliga Colaadda:-** | Waxa loola jeedaa xilliyada ciidamadu ku jiraan colaadaha. |
| **Warbixin :-** | Waxa loola jeedaa warbixinaha ay soo saaraan hay'adaha garsoorka. |
| **Shaqaale :-** | Waxa loola jeedaa shaqaalaha joogtada ah ama aan joogtada ahayn ee ka hawl-gala hay'adaha garsoorka. |
| **Garsoor :-** | Waxa loola jeedaa Garsoorka Ciidamada Qaranka . |
| **Maxkamadda Sare :-** | Waxa loola jeedaa Maxkamadda Sare ee Ciidamada Qaranka oo ah maxkamadda u sarraysa garsoorka Ciidamada Qaranka |
| **Maxkamadda Dastuuriga ah :-** | Waxa loola jeedaa Maxkamadda Dastuuriga ah ee dalka. |
| **Dastuur** :- | Waxa loola jeedaa Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland. |
| **Xukun :-** | Waxa loola jeedaa xukun ay soo saartay maxkamadi |
| **Shaqaalaha garsoorka :-** | Waxa loola jeedaa shaqaalaha maxkamadaha iyo Xeer-ilaalinta Ciidamada Qaranka . |
| **Dacwadda tashiga ah :-** | Waxa loola jeedaa dacwadda uu xeer waajibiyay in ay galaan ugu yaraan saddex garsoore. |

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL • FAAFINTA RASMIGA AH • OFFICIAL GAZETTE • SOLICITOR GENERAL OFFICE

**Dacwad aan tashi ahayn :-** Waxa loola jeedaa dacwad uu geli karo hal garsoore.

**Sabool :-** Waxa loola jeedaa qof aan haysan dhaqaale uu ku qabsan karo qareen.

**Dacwad ciqaab ah:** Waxa loola jeedaa dacwad ku sallaysan fal-dembiyeed uu xeer dhaqan-gal ahi si'cad uga dhigay dembi.

### Qodobka 3aad
### Xadka Dabbaqaadda Xeerka

1. Xeerka waxa lagu dabbaqayaa, isla markaana loo raacayaa nidaaminta hawlaha garoorka Ciidamada Qaranka ee JSL.
2. Xeerkan laguma dhaqi karo xubin rayid ah oo aan ka tirsanayn Ciidamada Qaranka ee JSL.

### Qodobka 4aad
### Tafsiirka Xeerka

Waxa xeerkan loo fasirayaa si waafaqsan:

1. Mabaadii'da saldhigga u ah Dastuurka Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland.
2. Axkaamta Shareecadda Islaamka.

### Qodobka 5aad
### Ujeeddada Xeerka

Ujeeddooyinka xeerkani waa:

1. in la'helo xeer lagu nidaamiyo qaab-dhismeedka, maamulka, awoodaha iyo waajibaadka garsoorka Ciidamada Qaranka.
2. In la'sugo madax-bannaanida garsoorka Ciidamada Qaranka.
3. In la'helo xeer qeexaaya awoodaha ka garnaqista dacwadaha ee maxkamadaha ciidamada.
4. In la'helo xeer qeexaaya kala sarraynta maamul ee garsoorka ciidamada.
5. In la'helo xeer qeexaaya habka loo magacaabaayo, shuuradaha lagu magacaabaayo ama xilka lagaga qaadaayo garsoorka ciidamada.

### Qodob 6aad
### Dabciga Xeerka

1. Xeerkani waxa uu dabci ahaan noqonayaa xeer maamul oo lagu nidaaminayo hawlaha garsoorka Ciidamada Qaranka.
2. Xeerkan looma adeegsanayo, isla markaana laguma jidaynayo ciqaab iyo ganaaxyo mana yeelanayo dabci xeer-ciqaabeed.

### Qodobka 7aad
### Mabaadii'da Garsoorka

Mabaadii'da saldhigga u ah garsoorka Ciidamada Qarankaee JSL waa:

1. Shareecada Islmaaka
2. Madaxbannaanida garsoorka oo ah mid buuxda oo ay kaga madaxbannaan yihiin dhammaan hay'adaha kale ee qaranka iyo talisyada Ciidamada Qaranka



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL * FAAFINTA RASMIGA AH * OFFICIAL GAZETTE * SOLICITOR GENERAL OFFICE

3. Awoodda garsoorku waxa ay gaar u tahay garsooreyaasha, uma wareegi karto cid kale, waxana reebban in si'toos ah iyo si'dadban loo faro geliyo madaxbannaanida iyo awoodda garsoorka Ciidamada Qaranka.
4. Dhexdhexaadnimo, daacadnimo iyo ku dhaqanka Dastuurka iyo xeerarka dalka.

**Qodobka 8[aad]**

**Luqadda Garsoorka**

1. Luqadda rasmiga ah ee shaqo ee garsoorka ciidamadu waa af-Soomaali, haddii loo baahdana hay'adaha garsoorka ciidamadu waxay adeegsan karaan luqado shisheeye.
2. Haddii dhinacyda dacwadda darteed, marag ama sabab kale darteed cid horjoogta maxkamadda ay ku hadasho af aan ahayn Af-Soomaali, waxa waajib ah in la'turjmo.

## QAYBTA LABAAD
## QAAB-DHISMEEDKA NIDAAMKA GARSOORKA CIIDAMADA QARANKA

**Qodobka 9[aad]**

**Qaab-dhismeedka Hay'adaha Garsoorka Ciidamada Qaranka**

1. Garsoorka ciidamada qaranku si la'mid ah maxkamadaha aan ahayn kuwa ciidamada waxa uu ka kooban yahay labada qaybood ee kala ah;
   b. Maxkamadda Ciidamada Qaranka, iyo
   t. Xeer-Ilaalinta Ciidamada Qaranka.
2. Labada qaybood ee faqradda hore ku xusan mid waliba waxa ay leedahay jiritaan qaanuuni ah waxayna u xil-saaran tahay xil iyo waajibaad u gaar ah oo ay si' madaxbannaan u gudanayso.
3. Maxkamadda Ciidamada Qaranku waxay ka koobnaanaysaa;
   b. Maxkamadda Sare ee Ciidamada Qaranka,
   t. Maxkamadaha Darajada Koowaad oo fadhigoodu noqonayo laba aag oo kala ah Aagga Bari iyo Aagga Galbeed.
4. Maxkamadda Derajada Koowaad ee aagga bari waxa ay awood gaar ah u leedahay dhegeysiga falalka ka dhacay gobollada kala ah: SANAAG, SOOL iyo TOG-DHEER.
5. Maxkamadda Derajada Koowaad ee aagga galbeed si la'mid ah xaaladda ku sugan xarafka hore, waxa ay awood gaar ah u leedahay dhegeysiga falalka ka dhacay gobollada kala ah: AWDAL, MAROODI-JEEX iyo SAAXIL.
6. Maxkamadda Sare ee ciidamadu waa hay'adda derajo ahaan ugu sarraysa nidaamka garsoorka ciidamada.
7. Maxkamadda Sare ee ciidamada waxay awood u leedahay dhegeysiga racfaannada laga soo qaatay go'aannada maxkamadaha derajada koowaad.
8. Maxkamadda Sare ee Ciidamada Qaranku waxa ay dhegeysiga dawcadaha ku geli kartaa guud ahaan dalka oo dhan.
9. Maxkamadda Sare ee Ciidamada Qaranku xarunteendu waa magaalo madaxda dalka.
10. Maxkamadda derajada koowaad waxa ay dhegeysiga dacwadaha ku geli kartaa deegaan kasta oo ka tirsan guud ahaan gobollada xadka awooddeedu gaadhsiisan tahay.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 10aad

## Awoodda Gar-maqalka Garsoorka Ciidamada

1. Maxkamadaha Ciidamada Qaranku waxay awood u leeyihiin dacwadaha ciqaabta ah ee ka dhanka ah xubnaha Ciidamadda Qaranka xaaladaha nabadda iyo colaadda.
2. Haddii xubin ciidan ahi uu ka galo fal-dembiyeed xilli nabad ah xubin ciidamada qaranka ah, waxa awoodda qaadista dacwadda leh Maxkamadaha Ciidamada Qaranka.
3. Maxkamadaha Ciidamada Qaranku marka ay qaadayaan dacwad ay gar-maqalkeeda awood u leeyihiin waa in ay raacaan xeer-ciqaabeed si'cad u tilmaamaya dembiyada soo hoos galaya awoodaha Maxkamadaha Ciidamadda Qaranka.
4. Habraaca qaadista dacwadaha waxa loo raacayaa si'waafaqsan Xeerka Habka Ciqaabta.

## Qodobka 11aad

## Qaab-dhismeedka Maxakamadda Sare Ee Ciidamada Qaranka

1. Tirada Garsooreyaasha maxakamadda sare ee ciidamada kama yaraan karto 5 kamana badnaan karaan 9 Garsoore oo loo soo magacaabay si'xeerkan waafaqsan.
2. Maxkamadda sare ee Ciidamadu waxa ay yeelanaysaa qaab-dhismeed ka kooban:
   b. Guddoomiye iyo guddoomiye ku-xigeen, iyada oo garsooraha ugu derejo sarreeya uu noqonayo guddoomiye ku-xigeenka Maxkamadda Sare ee Ciidamada Qaranka.
   T. Garsooreyaal.
   J. Waaxo maamul iyo xafiisyo.
   X. Kaaliyeyaal, hawl-wadeenno iyo shaqaale
   Kh. Guud ahaan maamulka xafiisyada iyo xil-gudashadoodu waxa ay hoos imanayaan awoodda guddoomiyaha.
   D. Kaaliyaha sare ayaa ugu derajo sarreeya jaranjarrada maamul ee shaqaalaha maxkamadda sare ee ciidamada.

## Qodobka 12aad

## Xilka iyo waajibaadka Maxkamadda Sare Ee Ciidamada Qaranka

1. Maxkamadda Sare ee Ciidamada Qaranku waa hay'adda garsoor ee ugu sarraysa nidaamka garsoorka ciidamada, fadhigeeduna waxa uu noqonayaa magaalo-madaxda.

2. Maxkamadda sare ee ciidamada qaranku marka ay lagama maarmaan u aragto, waxa ay fadhigeeda ku qabsan kartaa meel kasta oo ka mid ah gudaha xuduudaha dalka Somaliland, iyada oo awood u leh (Jurisdiction) go'aan ka gaadhista dacwadaha ka dhaca dalka ee racfaanka looga soo qaato.
3. Maxkamadda Sare ee Ciidamada Qaranku waxay awood u leedahay;
   b) Dhegeysiga racfaannada laga soo qaato maxkamadaha derajada koowaad ee Ciidamadda Qaranka.
   t) Dib u eegista xukunnada ka soo baxa Maxkamadda Sare ee ciidamada si'waafaqsan hab-raaca dib u eegista xukunnada.
   j) Awoodda wareejinta dacwad ka socota aag derajo in ay u wareejiso aag derajo kale haddii ay sidaa ku jirto danta caddaaladda oo dhinac ka mid ah dhinacyadu uu sidaas codsaday.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

x) Ka go'aan gaadhista khilaafyada ka dhex abuurma qaybaha garsoorka ee ku saabsan xagga awoodda dhegeysiga dacwadaha iyo awoodda gar-maqalka.

## Qodobka 13aad

## Shuruudaha Magacaabista Guddoomiyaha iyo Garsooreyaasha Maxkamadda Sare

Qofka loo magacaabayo guddoomiye ama garsoore maxkamadda sare ee ciidamada waa in uu buuxiyo shuruudahan hoos ku cad:

1. Waa in uu yahay qof muslim ah oo ku dhaqma Diinta Islaamka.
2. Waa in uu yahay muwaaddin u dhashay Somaliland;
3. Waa in aanay da'diisu ka yarayn 35 sannadood, kana weynaan 65sanno.
4. Waa in uu haysto shahaado jaamacadeed oo sharciga ah gaar ahaan barashada culuunta denbiyada iyo Shareecada.
5. Waa in uu leeyahay waayo'aragnimo aan ka yarayn toddoba (7) sannadood oo uu ku shaqeeyey garsoore, qareen ka hor doodda maxkamadaha Ciidamada Qaranka ama xeer-ilaaliye.
6. Waa in uu yahay qof ku sifoobay aqoon, karti, xil-kasnimo dhexdhexaadnimo iyo daacadnimo, isla markaana ka madaxbannaan siyaasadda.
7. Waa in aanu galin faldambiyeed ay maxkamadi ku heshay shantii sanno ee ugu dambeeyey.
8. Waa in aanu galin fal anshax xumo ah oo la'xidhiidha arrimaha garsoorka intii uu ku jiray xirfadda sharciga.
9. Waa inuu kamid yahay Ciidamada Qaranka ee kala duwan.

## Qodobka 14aad

## Magacaabista Guddoomiyaha iyo Garsooreyaasha Maxkamadda Sare ee Ciidamada

Guddoomiyaha iyo Garsoorayaasha Maxkamada Sare ee Ciidamada qaranka waxaa magacaabistooda iyo Xilka qaadistooda leh Madaxwayanaha Jamhuuriyada Somaliland, ka dib marka uu la tashado Wasiirka Gaashaandhigga

## Qodobka 15aad

## Asbaabaha Xil Ka Qaadista Guddoomiyaha iyo Garsooreyaasha Maxkamadda Sare ee Ciidamada

1. Guddoomiyaha iyo garsooreyaasha maxkamadda sare ee ciidamada waxa xilka lagaga qaadi karaa;
    b. Haddii uu xilka u gudan kari waayo sababo caafimaad darteed oo ay si rasmi ah u caddeeyeen saddex dhakhtar oo leh takhasus.
    t. Haddii uu xilkiisa u gudan kari waayo karti xumo, ku kaco musuqmaasuq, xeer jebin ama eex iyo qaraabo kiil,
    j. Haddii uu soo gudbiyo is'casilaad qoraal ah Madaxweynuhuna ka aqbalo;
2. Jagada Guddoomiyaha ama Garsoorayaasha Maxkamadda Sare ee Ciidamada qaranku waxay ku bannaanaan kartaa, haddii marka Guddoomiyaha ama garsooraha:

b) Ay geeri ku timaaddo;
t) Uu iskii isaga casilo xilka, Madaxweynuhuna ka aqbalo;
j) Xilka looga qaado qaab waafaqsan faqradda 1aad ee qodobkan;
x) Loo magacaabo xil kale oo ciidamada qaranka ah ama



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

Kh) Uu iskaga tago ciidankii uu ka tirsanaa

## Qodobka 16aad
## Fadhiyada Maxkamadda Sare

Fadhiyada Maxkamadda Sare waxa ay u kala baxayaan:

1. Fadhi caadi ah oo ka kooban saddex garsoore;
2. Fadhi buuxa oo ka kooban dhammaan garsooreyaasha Maxkamadda Sare.
3. Fadhiyada maxkamadda sare waxay ku furmayaan marka ay fadhiyaan kala badh iyo hal tirada xubnaha garsoorayaasha.
4. Garsoorayaasha maxkamadda sare waxay go'aamada ku gaadhayaan cod hal dheeri ah.

## Qodobka 17aad
## Shuruudaha Magacaabista Garsooreyaasha Maxkamadda Derajada Koowaad

1. Qofka loo magacaabayo jagada garsoore ee maxkamadda derajada koowaad waa in uu buuxiya tilmaamaha ku xusan qodobkan:
   b. Waa in uu ahaadaa qof aan da'diisu ka yarayn 35 sanno.
   t. Waa in uu haystaa shahaado cilmiga sharciga ah, gaar ahaan sharciga denbiyada oo uu ka soo qaatay jaamacad la'aqoonsan yahay.
   j. Waa in uu yahay qof caddaalad iyo dhexdhexaadnimo **ciidamada** dhexdiisa ku suntan.
   x. Waa in uu leeyahay waayo'aragnimo 5 sanno ah oo la'xidhiidha aqoonta sharciga kuna soo shaqeeyay, qareen, la-taliye sharci, macallin sharciga dhiga, ku-xigeen xeer -ilaaliye guud.
   kh. Waa in aanu xukun dembi ahi ku dhicin 5 tii sanno ee ugu dambaysay.
   d. Waa in uu ka madaxbannaan yahay siyaasadda iyo xisbiyada.
2. Garsooreyaasha maxkamadda derajada waxa ay wadajir u dhegeysanayaan marka laga reebo garsooreyaasha ku maqan si xeerka waafaqsan dacwadaha ay maxkamaddu guda gelayso gar-maqalkooda.

## Qodobka 18aad
## Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Ciidamada Qaranka

1. Ciidamada Qarankawaxay yeelanayaan Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud oo ka kooban:
   b. Xeer-ilaaliyaha Guud.
   t. Ku-xigeennada xeer-ilaaliyaha guud.
   j. Iyo shaqaalaha xafiiska xeer-ilaaliyaha guud.
2. Xeer-ilaaliyaha Guud iyo ku-xigeenka Xeer-ilaaliyaha Guud ee Ciidamada qaranka waxaa magacaabistooda iyo Xilka qaadistooda leh Madaxwayanaha Jamhuuriyada Somaliland, ka dib marka uu la tashado Wasiirka Gaashaandhigga
3. Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud xaruntiisu waxa ay noqonaysaa magaalo madaxda dalka, waxaanu xafiisyo ku yeelanayaa goob kasta oo ay ku taallo maxakamad ciidan.
4. Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud waxa uu yeelanayaa shaqaale iyo hawl-wadeenno ka kaalmeeyaa xil-gudashadiisa.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL * FAAFINTA RASMIGA AH * OFFICIAL GAZETTE * SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 19aad

### Xilka iyo Waajibaadka Xeer-ilaaliyaha Guud

1. Xeer-ilaaliyaha Guud waxa uu awood u leeyahay guud ahaan baadhista iyo oogista dembiyada ciqaabi ka dhalanayso ee ay galaan xubnaha Ciidamada Qaranka
2. Horgeynta eedaysanayaasha fal-dembi ama fal-dambiyeed loo haysto maxkamadda ciidan ee awoodda u leh.
3. Dacwad oogista maxakamadaha hortooda ee Ciidamada Qaranka.
4. Hagista baadhisaha dembiyada.
5. Ka talo siinta madaxweynaha cafiska xubnaha ciidamada ee xukun dembi lagu helay, isla markaana lagu xukumay si'xeerka waafaqsan.
6. Diyaarinta iyo daraasaynta xeerarka qabyada ah ee ka dhiman maxakamadaha Ciidamada Qaranka.
7. La'shaqaynta hay'adaha ammaanka iyo caddaaladda ee dalka.
8. Diyaarinta warbixin-sanadeedka noocyada dacwadaha ee uu kaga oogay maxkmadaha ciidamada iyo marxaladahada ay galeen iyo soo jeedimaha la'xidhiidha qorasheyaasha waxqabadkiisa.
9. Tababarrada iyo kor u qaadista aqoonta baadhayaasha **ciidamada** ah ee la'xidhiidha baadhista dembiyada iyo dacwad oogista.
10. Xeer-Ilaaliyaha Guud iyo ku-xigeennada Xeer-Ilaaliyaha Guud waxa ay ka qayb geli karaan dacwadaha dhammaan derajooyinka maxakamadaha.
11. Go'aanka dacwad oogista waxa u madaxbanaan Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud.

## Qodobka 20aad

### Awoodaha Dacwad Oogiseed ee Xubnaha Xafiiska Xeer-Ilaalinta Guud

1. Xeer-Ilaaliyaha Guud iyo Ku-xigeennada Xeer-Ilaaliyaha Guud waxa ay ka qayb geli karaan dacwadaha dhammaan derajooyinka maxkamadaha Ciidamada Qaranka ee J.S.L
2. Go'aanka dacwad oogista waxa u madax banaan Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Ciidamada Qaranka ee J.S.L

## Qodobka 21aad

### Awoodda Baadhista Dacwadaha

1. Waaxda dembi-baadhista dambiyada ee Booliska ayaa u xil-saaran baadhista dacwadaha ciqaabta ah ee hoos yimaadda awoodda hay'adaha garsoorka Ciidamada Qaranka.
2. Xeer-ilaaliyaha Guud waxa uu magacaabi karaa baadhayaal gaar ah oo soo diyaariya warbixin hore oo hor-dhac ah oo ka tirsan Ciidamada Qaranka, haddii uu arko in ay daruuri u tahay baadhista dacwadda, iyada oo aan waxba loo dhimayn mas'uuliyadda baadhista ee xafiiska dambi-baadhista.
3. Habraaca baadhista dacwadda waxa loo raacayaa Xeerka Habka Ciqaabta ee ay ku dhaqmaan garsoorka Ciidamada Qarankaee JSL.

## Qodobka 22aad

### Hab-raacyada Baadhista iyo Awoodda Xafiiska Baadhista

1. Xafiiska baadhista denbiyada, waxa uu nidaamka baadhista denbiyada u raacayaa si la'mid ah hab-raaca baadhista denbiyada kale ee ciqaabta ah ee nidaamka garsoorka aan ciidamada ahayn.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

2. Natiijada baadhista fal-dabmiyeedku ma go'aaminayso in eedaysanuhu galay danbi ilaa ay maxkamadda awoodda u lihi go'aamiso, isla markaana xukun ku soo saarto.

## QAYBTA SADDEXAAD
## GUDDIDA HAWLAHA MAAMULKA GARSOORKA

### Qodobka 23aad
### Guddida Maamulka iyo Hawl-gelinta Garsoorka

1. Xeerkan waxaa lagu aasaasay guddida maamulka iyo hawl-gelinta garsoorka oo gudanaysa xilka iyo waajibaadka xeerku u jideeyay.
2. Guddidu waxa ay noqonaysaa hay'adda maamul ahaan ugu sarraysa hay'adaha garsoorka ciidamada.

### Qodobka 24aad
### Qaab-dhismeedka Guddida

Guddida oo yeelanaysa dabci maamul si la mid ah guddida cadaaladda, waxay ka kooban tahay 5 xubnood oo ka kala imanaya meelahan.

1. Guddoomiyaha iyo Ku-xigeenka Guddomiyaha Maxkamadda Sare Ee Ciidammada.
2. Xeer-ilaaliyaha Guud ee Ciidamada Qaranka ee JSL.
3. Iyo laba xubnood oo hore uga tirsanaan jiray ciidamada qaranka, oo galay hawlgab kuwaas oo lagu soo xulanayo aqoonta ay u leeyihiin sharciga iyo maamulka, labada xubnood waxa magacbistooda iyo xil ka qaadistoodaba leh madaxweynaha JSL marka uu la tashado wasiirka gaashandhiga.
4. Guddida waxaa guddoomiye u noqonaya gudoomiyaha maxkmadda sare ee ciidamada, marka uu maqan yahayna waxaa guddoominaya guddoomiye ku-xigeenka maxkamadda sare.
5. Guddidu waxay yeelanaysaa kaalliye sare, waxaana soo magacaabaya guddoomiyaha.

### Qodobka 25aad
### Xilka iyo Waajibaadka Guddida

Guddidu waxay yeelanaysaa awoodahan:

1. Magacaabista, beddelidda iyo shaqo ka saaridda garsoorayaasha maxkamadda darajooyinka hoose iyo ku-xigeennada xeer-ilaaliyaha guud ee Ciidamada Qaranka ee J.S.L.
2. Qiimaynta hannaanka xil-gudasho ee xubnaha kor ku xusan.
3. Fulinta siyaasadaha iyo qorshayaasha guud ee la xidhiidha horumarinta nidaamka garsoorka ciidamada ee ay dejisay wasaaraddu.
4. Kobcinta aqoonta iyo xirfadda xubnaha kor ku xusan iyo qabashada tababbarada la xidhiidha.
5. Guddidu waxay u madax-bannaan tahay hawsheeda, sidoo kale waxay wada shaqayn aan waxba u dhimayn hawshooda la yeelanaysaa hay'adaha kale ee ay ugu horrayso wasaaraddu.
6. Dhagaysiga cabashooyinka la xidhiidha xil-gudashada garsoorayaasha maxkamadaha darajada koowaad iyo ku-xigeennada xeer-ilaliyaha guud ee Ciidamada Qaranka.
7. Dhagaysiga cabashooyinka la xidhiidha xil-gudashada garsoorayaasha maxkamadaha darajada koowaad iyo ku-xigeennada xeer-ilaliyaha guud ee Ciidamada Qaranka ee J.S.L.

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL * FAAFINTA RASMIGA AH * OFFICIAL GAZETTE * SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 26aad

## Fadhiyada Guddida.

Fadhiyada guddidu waxay noqon karaan:

1. Fadhi caadi ah iyo kuwo an caadi ahayn oo ay soo jeediyeen ugu yaraan laba xubnood.
2. Fadhiyada guddidu waxay ku furmayaan marka ay fadhiyaan saddex xubnood.
3. Guddidu waxay go'aamada ku gaadhayaan cod hal dheeri ah.

## Qodobka 27aad

## Dhaarta Garsoorka Ciidamada Qaranka

1. Guddoomiyaha Maxkamada sare ayaa dhaarinaya guddoomiyaha Maxkamadda sare ee ciidamada, madaxweynaha hortiisa.
2. Guddoomiyaha Maxkamada sare ee ciidamada ayaa madaxweynaha hortiisa ku dhaarinaya garsooreyaasha iyo xeer-ilaaliyayaasha ciidamada.
3. Xubnaha garsoorka waxa lagu dhaarinayaa dhaarta dastuuriga ah ee ku xusan Qodobka 129 ee Dastuurka.

## Qodobka 28aad

## Xasaanadda iyo dhawrsanaanta Garsoorka ciidamada

1. Madaxda Garsoorka Ciidamada Qaranka waxay leeyihiin dhawrsanaan iyo xasaanad uu xeerkani jideeyay.
2. Lama qaban karo, lama baadhi karo lamana xidhi karo illaa iyo ogolanaasho laga helo guddoomiyaha.

## Qodobka 29aad

## Hawl-gabka iyo Xaqsiinta.

1. Dhammaan garsooreyaasha kala duwan Xeer-ilaaliyaha Guud iyo ku-xigeennada xeer-ilaaliyaha guud waxa ay yeelanayaan xaqa hawl-gabka iyo xaqsiin.
2. Nidaamka hawl-gabka iyo xaqsiintooda waxa loo raacaya si'waafaqsan Xeerka Hawl-gabka iyo Xaqsiinta Ciidamada Xeer.Lr.88/2019.

## Qodobka 30aad

## Mushaharka iyo Gunnada

1. Garsoorayaasha maxkamadaha ciidamada iyo xeer-ilaaliyaha guud iyo kuxigeenadiisu waxay yeelanayaan mushahar iyo gunno ay si bille ah u helaan.
2. Garsoorayaasha maxkamadda sare ee ciidamada iyo xeer-ilaaliyaha guud ee ciidamadu waxay heli doonaan guno xileed uu madaxweynuhu ku soo saaro wareegto madaxweyne.
3. Garsoorayaasha iyo xeer ilaaliyaasha ciidamada qaranku waxay kala mid yihiin xuquuqda hawlgabka iyo xaqsiinta xubnaha ciidamada qaranka si waafaqsan xeerka hawlgabka iyo xaqsiinta ciidamada xeer L.r 88/2019

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## QAYBTA AFRAAD
## AWOODDA WASAARADDA GAASHAANDHIGGA, MADAXWEYNAHA IYO WARBIXINAHA

### Qodobka 31aad
### Xilka Iyo Waajibaadka Wasaaradda

1. Wasaaraddu xidhiidhka ay la leedahay hay'adaha garsoorka ciidamada waxa ay u raacaysaa si' waafaqsan xilka iyo waajibaadka wasaaradda ee ku tilmaaman Xeerka Kala-xadaynta Nidaamka Xukuumadda.
2. Wasaaraddu waxay u xil-saaran tahay, isla markaana mas'uul ka tahay qorshaha iyo siyaasadda lagu horumarinayo Nidaamka garsoorka ciidamada iyo baahinta awoodda xil-gudasho ee hay'adaha garsoorka ciidamada.

### Qodobka 32aad
### Madaxweynaha

1. Madaxweynuhu isaga oo gudanaya awoodihiisa dastuuriga ah, waxa uu xeerkan ku yeelanayaa cafinta xukunsanayaasha si'xeerka waafaqsan.
2. Heshiiska isu celinta eedaysanayaasha ama xukunsanayaasha xubnaha ka ah ciidamada ee dal kale u baxsaday xilligii gar-maqalka dacwadda ee ay dawladdu la' galayso dawlad kale si'xeeraka waafaqsan.

## QAYBTA SHANAAD
## NIDAAMKA SHAQAALAHA HAY'ADAHA GARSOORKA.

### Qodobka 33aad
### Shaqaalaha Hay'adaha Garsoorka Ciidamada

1. Shaqaalaha ka halw gelaya hay'adaha garsoorka ee ciidamada si la'mid ah shaqaalaha kale ee ka hawl-gala hay'adaha garsoorka ee aan ahayn kuwa ciidamada waxaa loo raacayaa Xeerka Shaqaalaha Dawladda.
2. Guud ahaan waajibaadka xil-gudasho ee shaqaalaha, fasaxyadooda, nidaamka hawl-gabka iyo xuquuqaha kala duwan waxa ay kala mid yihiin shaqaalaha kale ee dawladda si' Xeerka Shaqaalaha Dawladda Waafaqsan.
3. Hay'adaha garsoorka ciidamadu waxa ay qaadan karaan shaqaale aan joogto ahayn sida: khubaro lagu qaatay aqoontooda iyo waayo'aragnimadooda.
4. Shaqaalaha ku xusan faqradda hore laguma dabbaqayo xeerka shaqaalaha dawladda.

### Qodobka 34aad
### Xidhiidhka Maxkamadaha Rayidka ah iyo Maxkamadaha Ciidamada

1. Haddii dood sharci ka dhalato awoodda gar-maqalka maxkamadaha Ciidamada Qaranka ee dacwad ciqaab ah oo dhinac ku doodo: in maxkamadaha rayidka ahi leeyihiin awoodda gar-maqalka, waxa loo gudbinayaa dacwad dulucdeedu tahay tafsiir sharci Maxkamadda Dastuuriga ah ee dalka, si' ay uga soo saarto go'aan kama danbays ah.
2. Dacwad kasta oo la'xidhiidha muran dastuuri ah waxa awoodda gar-maqalka leh Maxkamadda Dastuuriga ah si'waafaqsan Xeerka Nidaamka Garsoorka Rayidka ah.

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

# QAYBTA LIXAAD
# HAB-RAACA XAQ AH EE DACWADAHA

## Qodobka 35aad
## Xaqa Dacwadda iyo Is'difaaca

Iyada oo laga duulayo xuquuqda aasaasiga ah ee ku astaysan qodobka 28aad ee Dastuurka Somaliland,

1. Xubin kasta oo ka tirsan ciidamada oo lagu soo oogay dacwad waxa uu xaq u leeyahay in uu iska difaaco Maxkamadda ciidamada ee awoodda u leh gar-maqalka dacwadda horteeda.
2. Eedaysanuhu waa dembi laawe ilaa maxkamaddu ku hesho fal-dembiyeed.
3. Xubinta ka tirsan ciidamada ee lagu soo oogay dacwad ciqaabteedu culus tahay ee aan awood u lahayn inuu qabsado qareen, waa in garsooraha dacwadda guddoomiyanaa uu u magacaabo qareen adeeg kaalmo sharci oo lacag la'aana.
4. Eedaysanaha waa in loo ogolaado in uu si'gaar ah ula kulmo qareenkiisa mar kasta oo uu u baahdo.
5. Eedaysanaha waa in la siiyo muddo ku filan oo uu ku diyaarsado difaaciisa.

## Qodobka 36aad
## Adeegsiga Qareen

1. Ciidamada Qaranka waxay yeelanayaan qareenno leh aqoon sharci oo ay kaga hor doodaan maxkamadaha Ciidamada Qaranka.
2. Qareennada Ciidamada Qaranka ee ku xusan qodobkan waxa ay difaacyaan qof kasta oo lagu soo oogo dacwad oo aan awood u lahayn in uu qabsado qareen.
3. Guddoomiyaha Maxkamadda sare ayaa diiwaangelinaya xubnaha Ciidamada Qaranka ka tirsan ee leh aqoonta sharci ee qaban karaan shaqo qareennimo.
4. Ajuurada qareenka ka tirsan Ciidamada Qaranka waxa bixinaya qaranka, iyada oo lagu darayo miisaaniyadda Garsoorka Ciidamada Qaranka.
5. Eedaysanaha awoodaa waxa uu qabsan karaa qareen rayid ah. Qareenka rayidka ah waxa waajib ku ah in uu ilaaliyo wixii sir ciidan ah ee uu ogaaday intii uu dacwadda ku jiray.
6. Eedaysanaha aan awood u lahayn inuu qabsado qareen, garsooraha dacwadda guddoominaaya waa in uu siiyo qareen adeeg kaalmo sharci oo bilaa lacag ah.

## Qodobka 37aad
## U'Furnaanshaha Dadweynaha ee Fadhiyada Maxkamadaha

1. Doodaha maxkamaduhu asal ahaan waa kuwo dhegeysigooda ay u furan yihiin dadweynaha.
2. Guddoomiyaha dacwaddu waxa uu ka dhigi karaa fadhiga mid dadweynaha ka xidhan, haddii ay keensanayso ilaalinta sirta **ciidamada** ama jiraan sababo amni.

## Qodobka 38aad
## Qoraalka Xukunnada iyo Qaraarrada

1. Xukunnada iyo qaraarrada Maxkamaduhu waa in ay ahaadaan kuwo qoran oo sababaysan oo si'faahfaahsana loogu tilmaamay sababta xukunka iyo qodobada sharci ee la'dabbaqay iyo caddaymaha loo cuskaday.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

2. Xukunnada iyo qaraarrada oo qoran waa in la siiyo dhinacyada dacwadda oo uu ka mid yahay eedaysanuhu. Haddii tiro ka badan hal qof ay yihiin eedaysaneyaasha waa in eedaysane kasta la siiyo nuqul.
3. Maxkamaddu waa inay kaga dhawaaqdo xukunka ay soo saartay eedaysanaha hortiisa.

### Qodobka 39[aad]

### Dabbaqaadda Xeer-ciqaabeed Kale

Hay'adaha garsoorku waxa ay u raaci karaan isla markaana u adeegsan karaan dhegeysiga iyo xukun ka gaadhista dacwadaha ciqaabta ah xeerarka kale ee dhaqan-galka ah ee haddii ay lagama maarmaan u arkaan in ay jidaynayaan ciqaab la'xidhiidha dacawadda.

### Qodobka 40[aad]

### Fulinta Xukunnada Garsoorka

1. Xukun kasta oo garsoor oo kama dambeys ah waa in loo fuliyo si'xeerka waafaqsan.
2. Xukun kasta oo kama'danbays ah iyo amar kasta oo maxkamadeed waxaa waajib ku ah in cid kasta oo uu khuseeyaa ay sidiisa u fuliso.

### Qodobka 41[aad]

### Racfaannada iyo Cabashooyinka

1. Waxa bannaan in xukun kasta ama qaraar kasta oo ka soo baxay maxkamadaha gobollada iyo racfaanka looga racfaan qaato maxkamadda ka sarraysa.
2. Maxkamadda Sare ee ciidamadu waxa ay awood u leedahay in ay dib u eegto xukun ay soo saartay, haddii ay sidaas ku jirto danta caddaaladdu oo uu dalbado xukunsanuhu. Waxa reebban in xafiiska Xeer-ilaalintu dalbado dib u eegis xukunka Maxkamadda Sare ah, haddii aan codsiga Xeer-ilaaliyuhu u dan ahayn xukunsanaha.
3. Muddada racfaan'qaadashadu waa 30 (Soddon) cisho oo ka bilaabanta, maalinta lagu dhawaaqo go'aanka maxkamadda.
4. Haddii marka xukunka lagu dhawaaqay uu eedaysanaha ama qareenkiisu Maxkamadda horteeda ka sheego in uu racfaan qaatay waxa laga soo qaadayaa in racfaan la'qaatay waana in loo geliyo galka dacwadda.

## QAYBTA TODDOBAAD

## NIDAAMKA MAALIYADDA EE HAY'ADAHA GARSOORKA CIIDAMADA

### Qodobka 42[aad]

### Miisaaniyadda Hay'adaha Garsoorka Ciidamada

1. Hay'adaha garsoorka Ciidamada Qaranka ee JSL waxay yeelanayaan miisaaniyad u gaar ah oo loogu qoondeeyay miisaaniyadda qaranka oo ay ku gutaan shaqadooda.
2. Miisaaniyadda hay'adaha garsoorka ciidamada waxa loo raacayaa miisaaniyadda Wasaaradda Gaashaandhigga.
3. Xafiiska Guddoomiyaha Maxakamadda Sare ee ciidamada iyo Wasaaradda Gaashandhiga ayaa wada diyaarinaya miisaniyaddooda iyaga oo ku salaynaya baahiyaha shaqo, waxaana loo gudbinayaa Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda.
4. Miisaaniyadda garsoorka ciidamadu waa in ay ku jirtaa daryeelka iyo xuquuqda garsoorayaasha iyo xeer-ilaaliyayaasha.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL · FAAFINTA RASMIGA AH · OFFICIAL GAZETTE · SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 43aad
## Adeegsiga Miisaaniyadda

1. Hay'adaha garsoorka ciidamadu waxa ay miisanniyadooda u adeegsanayaan si' waafaqsan xeerarka maaliyadda iyo hab-raacyada kale ee la'xidhiidha miisaaniyadda.
2. Hannaanka adeegsiga miisaaniyaddu waa in loo raaco sida loogu qoondeeyay miisaaniyadda.

## Qodobka 44aad
## Deeqaha iyo Daymaha Ciidamada

1. Hay'adaha garsoorka ee ciidamadu waxa ay heli karaan deeqo, sidoo kalena waxay geli karaan daymo loo raacay si'xeerka waaafqsan.
2. Hay'adaha garsoorku waxay hannaanka deeqaha iyo daymaha u raacayaan si' waafaqsan xeerarka maaliyadda.

## Qodobka 45aad
## Dakhliga Waxsoosaaka Ciidamada

Dakhliga ciidamada ee ay ka helaan waxsoosaarka kala duwan sida: beeraha, wershadaha iyo agabka farsamooyinka gacanta, waxa loo qaabaynayaa si'xeerarka maaliyadda waafaqsan.

# QAYBTA SIDDEEDAAD
# QODOBBO KALA DUWAN

## Qodobka 46aad
## Warbixin-sannadeedka

Waxaa waajib ku ah Guddoomiyaha Maxkamada Sare & Xeer-ilaaliyaha Guud ee Ciidamada, in Guddiyadda labada Gole ee Baarlamanka JSL (Guurtidda & Wakiiladu) u yeedhi karaan, waxna ka waydiin karaan waajibaadkooda shaqo.

## Qodobka 47aad
## Xeerarka Ciqaabta Guud

Hay'adaha garsoorka ciidamadu waxa ay gar-maqalka dacwadaha ciqaabta ah u raacayaan xeerarka ciqaabta ah iyo xeerarka dhaqan-galka ah ee khuseeya.

## Qodobka 48aad
## Anshax-marinta Ciidamada

Qodobbada xeerkani waxba uma dhimayaan awoodda anshax-marineed ee ay leeyihiin saraakiisha ciidanku, iyaga oo raacaya hannaanka anshax-marinta ee u yaal Ciidamada Qaranka.

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 49aad
## Dabbaqidda Xeerarka

1. Hay'adaha garsoorka cidamadu waxa ay waajibaadkooda shaqo ku salaynayaan shareecada Islaamka, xeerkan, Dastuurka JSL Iyo Xeerarka ciqaabta ee dhaqan-galka ah.
2. Haddii ay iska hor yimaaddaan xeerkan iyo xeer kale oo dhaqan-gal ah waxa la dabbaqayaa xeerkan.

## Qodobka 50aad
## Xeer-nidaamiyaha Xeerka Nidaamka Garsoorka

Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee ciidamada oo kaashanaya xeer-ilaalyaha guud ee ciidamadu waxa uu soo saarayaa xeer-nidaamiye aan xeerkan ama xeer kale oo dhaqan-gal ah ka hor-imanayn.

## Qodobka 51aad
## Laalid

Waxaa xeerkan lagu laalay xeer kasta ama qodob kasta oo ku jira xeer dhaqangal ah kana hor imanaya xeerkan.

## Qodobka 52aad
## Dhaqan-galka Xeerka

Xeerkani waxa uu dhaqan-galayaa marka labada Gole ee Baarlamaanka (Golaha Guurtida iyo Golaha Wakiilladu) ansixiyaan, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somalilandna saxeexo, ee uu ku soo baxo faafinta rasmiga ah si'waafaqsan Dastuurka JSL.

**Jamaal Jaamac Jiir**
**Ku-xigeenka Xoghayaha Guud, ahna ku simaha Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiillada JSL**
____________[________________

**Md. Siciid Mire Faarax (Giire)**
**Gudoomiye ku-xigeenka 1aad ahna ku simaha Guddoomiyaha Golaha Wakiillada JSL**
______[__________________